



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 18

TAARIIKH: 27/06/2016

**ANSIXINTA SHARCIGA HESHIISKA SOOMAALIYA IYO TURKEY
EE KU SAABSAN WADASHAQAYNTA CAAFIMADKA**

MADAXWAYNAHA J.F.S

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
- MARKUU ARKAY:** Qodobka 9aad, Xarafka Q
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 1303/3/1/9/16 ee 16/04/2016 Heshiiska Dhexmaray Soomaaliya iyo Turkey kuna saabsa wadashaqaynta Dhanka Caafimaadkaiyo Aqoonta Caafimaadka .
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in Shacabka Soomaaliyeed si looga xaqabtiro Qaybha kala duwan ee caafimaadka.

Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday Ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Heshiiska dhexmaray Soomaaliya iyo Turkey kuna saabsan dhanka Caafimaadka iyo Aqoonta Caafimaadka.

Qodobka. 2aad

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 27/06/2016



**Madaxwaynaha J. F.S
Xasan Sheekh Maxamuud**



Ref: \303 /3/1/9/16:الرقم

Mogadishu, 16th April 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Caafimaadka.
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada
Hay'adaha Dowladda - L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Heshiis U Dhexeeya Soomaaliya Iyo Turkey Kuna Saabsan Wada
Shaqeynta Dhanka Caafimaadka Iyo Cilmiga Caafimaadka

M.ne Madaxweyne;


Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
go'aan ka gaaray ansixinta Heshiis u Dhexeeya Xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga iyo
Xukuumadda Federaalka Soomaliya oo Ku Saabsan Iskaashiga Dhanka Caafimaadka Iyo Cilmiga
Caafimadka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee fadhigiisii
1aad 16^{ka} Abriil 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku
ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 136 (Boqol Soddon iyo Lix) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 3 (Saddex) Xildhibaan.
- Xildhibaan ka aamustay 3 (Saddex) Xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM

Tell: +252 612224442/ +252 615577472


E-mail. speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

**ANSIXINTA HESHIIS U DHEXEYEA SOOMAALIYA IYO
TURKEY KUNA SAABSAN WADA SHAQEYNTA DHANKA
CAAFIMAADKA IYO AQOONTA CAAFIMAADKA**

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 142: Oggol (136) Diidmo (3) ka aamustay (3)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 16th April 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS




Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 16th April 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 16th April 2016





Tixraac: XRW/0000670 /11/2015

Taariikh: 12/11/2015

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole - "Ansixinta Heshiis U Dhaxeeya Soomaliya & Turkiga Kuna Saabsan Wada-shaqaynta Dhanka Caafimaadka & Aqoonta Caafimaadka"

Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,

Markuu arkay: Qod. 99^{aad} (a), (b), (c) & (i) ee Dastuurka JFS.
Markuu arkay: Qod. 100^{aad} (a) & (d) ee Dastuurka JFS.
Markuu arkay: Soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.
Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.42.11.15 ee 12/11/2015, kuna saabsanaa "Ansixinta Heshiis U Dhaxeeya Soomaaliya iyo Turkiga, Kuna Saabsan Wada Shaqaynta Dhanka Caafimaadka iyo Aqoonta Caafimaadka", oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.
Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo gudbinta "Heshiiska U Dhaxeeya Soomaaliya iyo Turkiga, Kuna Saabsan Wada Shaqaynta Dhanka Caafimaadk iyo Aqoonta Caafimaadka".

Wuxuu meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.42.11.15 ee 12/11/2015, kuna saabsanaa "Ansixinta Heshiis U Dhaxeeya Soomaaliya iyo Turkiga, Kuna Saabsan Wada Shaqaynta Dhanka Caafimaadka iyo Aqoonta Caafimaadka", oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey

Qodobka 2^{aad}

Shuruuda ku xiran Ansixinta Heshiiskan waa;


- 1- In ay ka wada fariistaan Wasaaradaha kala ah:-
 - a- Wasaaradda Caafimaadka
 - b- Wasaaradda Amniga Gudaha


- c- Wasaaradda Caddaaladda
- d- Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Dhiiri-gelinta Maal-gashiga.
- e- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

2- In la hagaajiyo siiqada tarjamada heshiiska.

Qodobka 3^{aad}

In si degdeg ah Golaha Shacabka loogu gudbiyo “Heshiiska U Dhaxeeya Soomaaliya iyo Turkiga, Kuna Saabsan Wada Shaqaynta Dhanka Caafimaadk iyo Aqoonta Caafimaadka” si ay uga gutaan xilkooda Dastuuriiga ah.


Mudane Maxamed Cumar Caden
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha JFS
Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka JFS





Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**HESHIIS U DHEXEEYA SOOMAALIYA IYO
TURKEY KUNA SAABSAN WADA SHAQEYNTA
DHANKA CAAFIMAADKA IYO AQOONTA
CAAFIMAADKA**

Xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga iyo Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya (oo noqonayo dhinacyada heshiiskan)

Ayadoo heshiiskan uu saldhig u yahay rabitaanka horumarinta Iskaashiga labada Xukuumadood ka dhexeeyo ee dhinacyada daryeelka Caafimaadka iyo Cilmiga Caafimaadka.

Ayagoo garwaaqsan in Iskaashigani yahay mid wax ku kordhinayo horumarinta daryeelka Caafimaadka ee shacabka labada Dal.

Waxay ku Heshiiyeen sida soo socoto:

Qodobka 1aad:

Ujeeddada

Labada dhinac, ayadoo lagu saleeynayo mabaadi'da sinaanta iyo wax isdhaafsiga, si waafaqsanna kala faa'idaysiga iyo shuruucda labada dal, waxay xoojinayaan wadashaqaynta Iskaashiga Daryeelka Caafimaadka iyo Culuumta Caafimaadka.

Qodobka 2aad:

Meelaha la iska Kaashanayo

Labada dhinac waxay Heshiiskan isaga kaashanayaan isla markaana xoojinayaan Daryeelka Caafimaadka iyo Culuumta Caafimaadka ee meelaha soo socda:

- a. Xoojinta nidaamyada Daryeelka Caafimaadka;
- b. La dagaalanka cudurada faafa iyo hawlaha talaalka;
- c. Horumarinta Daryeelka Caafimaadka Hooyada iyo Dhalaanka iyo yaraynta heerka dhimashada ee Hooyada iyo Dhalaanka;
- d. Barashada aqoonta Caafimaadka;
- e. Caafimaadka deegaanka;
- f. Adeegga Caafimaadka Dhimmirka;
- g. Daawada, kaydinta iyo daawo- diyaarinta iyo qalabka adeegga Caafimaadka;
- h. Maareeynta adeegyada caafimaadka degdega ah iyo maareeynta adeegyada caafimaadka xilliyada musiibooyinka.

Qodobka 3aad:

Qaabka wada Shaqaynta

Labada dhinac waxay heshiiskan Iskaashiga daryeelka Caafimaadka iyo Culuumta Caafimaadka uga wada shaqaynayaan qaababka soo socdo:

- a. Isdhaafsiga xogaha iyo Khibradaha;
- b. Isdhaafsiga wafuudda, Khubarada iyo hawlwadeennada Caafimaadka;
- c. Tababaro waqti gaaban ee hawlwadeenada Caafimaadka (gaar ahaan tiknooloogiyada cusub ee adeegga Caafimaadka);

- d. Iskaashiga ka wada shaqaeeynta mashaariicda wada jirka ah;
- e. Suurtogelinta Iskaashigha hay'adaha ku howlan caafimaadka;
- f. Ku Dhiirigelinta ka qayb-galidda aqoon-yahanada kulamada, aqoon iswaydaarisiyada, dood-cilmiyeedyada iyo shirar cilmiyeedka kale oo uu qabto mid ka mid ah labada dhinac.

Qodobka 4aad:

Guddiga Wadajir u shaqaynta

Dhinacyadu waxay dhisayaan guddi si wadajir ah uga shaqeeyo taaba-galinta heshiiskan, kaaso looga gol leeyahay ka howl-galidda iyo isku dubaridka faahfaahinta wada shaqaynta ka dhaxeeyso labada dhinac.

Guddigan wuxuu kulmayaa ugu yaraan halmar sanadkiiba, asagoo dib-u-eegis ku samaynaya, in si la taaban karo loo dhaqan-galiyo howlaha iskaashiga iyo barnaamijyada si waafaqsan habraaca ay labada dhinac isla ogolaadeen, kuna sameeyaan daba-gal sidii loo taaba-galin lahaa barnaamijyadaas.

Qodobka 5aad:

Daawaynta Bukaanka

Wasaarada Caafimaadka ee Jamhuuriyada Turkiga waxay Dalkeeda daaweyn lacag la'aan ah ugu qaadaysaa sanad kasto 250 bukaan ah oo Dalka Soomaaliya gudahiisa wax loogu qaban waayay.

Soo xulista bukaanadan waxaa sameeynaya Wasaarada Caafimaadka iyo Deryeelka Bulshada ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya iyo Safaaradda Dawlada Turkiga ay ku leedahay Soomaaliya, waxaana ugu dambaysta lagu soo dhameystiridoonaa ogolaashada Wasaarada Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Turkiga.

Qodobka 6aad:

Dhismaha iyo fududaynta howlaha Caafimaadka

Jamhuuriyadda Turkiga waxay abuuri kartaa goobo ay ka hawl galaan hawl-wadeennadeeda Caafimaadka si ay u fududeeyaan howlaha Caafimaad ee Soomaaliya. Arrimaha la xiriira howlaha fududaynta, waxaa isla xaddidaya labada dhinac. Muwaadiniinta shaqaalaha Caafimaadka Turkiga ah ee ka howl-galaya howlaha Caafimaadka Soomaaliya waxaa lagu maamulayaa Sharciga Turkiga.

Qodobka 7aad:

Hay'adaha Dhaqan-galinta

Wasaarada Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Turkiga iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa fulinaya hirgelinta Heshiiskan.

Goobaha hirgelinta iyo shuruudaha wada shaqaynta lagu xusay heshiiskan, waxaa la iskula xaddidayaa, diyaarinta qorsho Hawleedyo iyo Barnaamijyo lagu hirgalinayo oo waqtiyeysan iyo tira ahaanba ay dhinacyadu u arkaan in loo baahan yahay.

Qodobka 8aad:

Hannaanka dhaqaalaha

Booqashoyinka khubarada iyo shaqaalaha kale ee labada Dal ee soo galaya qaab dhismeedka heshiikan:

- a. Dhinaca wax diraya ayaa bixindoona kharashaadka socdaalka ee lagu aadayo, loogana soo noqonayo Dalka martigelinaya;
- b. Dhinaca martigelinaya waxa uu daboolayaa kharashaadka cuntada, hooyga, socdaalka dalka gudihisa (haddii loo baahdo) ee dadka martida ah. Waqtiga Booqashado waa in aysan ka badan laba Toddobaad.

Qodobka 9aad:

Xallinta khilaafaadka

Is qabad kasta oo ka dhasho fasiraadda ama dhaqan-gelinta heshiiskan, waxaa lagu xallinayaa wadahal, ayadoo loo marayo wadaxajood ama wadatashiyo labada dhinac ah, ayadoo loo marayo wadada dibloomaasiyadda.

Qodobka 10aad:

Dhaqan-galka iyo Muddada

Heshiiskan wuxuu dhaqan-galayaa taariikhda ay dhinacyadu kala helaan wargelinta qoraal ugu dambays ah, taas oo ay dhinacyadu isku wargelinayaan, ayadoo loo marayo wadada dibloomaasiyadda, kaddib marka ay soo dhamaystiraan habraac-sharciyeedka looga baahan yahay wadamooda si uu heshiiskani u noqdo mid loo maray nidaamka sharcigoodu ku xirayo meelmarin heshiisyada.

Heshiiskani waqtiga uu soconayo waa shan (5) sano. Heshiiskan waxa uu si aan kala go' lahayn u cusboonaysiismayaa muddooyin isku xig xiga oo min hal sano ah, haddii uusan dhinacyada mid ka mid ahi ku wargelin dhinaca kale si qoraal ah rabitaankiisa ah inuu doonayo inuu ka baxo muddo Lix (6) bilood ah ka hor dhammaashada waqtiga heshiiska, ayadoo loo marayo waddada dibloomaasiyadda.

Dhammaashada waqtiga heshiiskan ma saameeyndoonto hirgelinta howlaha iyo mashaariicda socota.

Heshiiskan waxaa xillikasta wax looga badaliskaraa, ogolaasho qoraal ah oo ay labada dhinac is dhaafsadeen kaddibna ay isla ogolaadeen. Wax-ka-badaliddu waxay ku dhaqangaleysaa si waafaqsan habraac-sharciyeedka ku xusan qodobka 10aad faqraddiisa 1aad.

Heshiiskan waxaa lagu dhammeystiray Istanbul 27 June 2013, asagoo ka kooban laba nuqul oo asal ah, luuqada lagu qorayna ay tahay Turki iyo Ingiriis loona turjumay Afsoomaali, dhammaan qoraalada si isku mid ah ayey rasmi u yihiin. Haddii ay kala duwanaasho xagga fasiraada ah dhacdo, qoraalka Ingiriiska ayaa noqonaya midka asalka ah ee la tixraacayo.

Wakiilka Xukuumadda Jamhuuriyadda
Turkiga

Wakiilka Xukuumadda
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Dr. Mehmet Muezzinoglu
Wasiirka Caafimaadka

Dr. Maryan Qaasim Ahmed
Wasiirka Horumarinta iyo Ad. Bulshada